

AMAR lr. 5

MAAMULKA WASAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA MAAMULAHA

MARKUU ARKAY Sharciga lr. 1301, ee 4 Nofember 1951, oo meelmarinayey Axdiga Wasaayadda Dhulka Soomaaliyeed, oo hoos-taga Maamulka Talyaaniga, una fulinaya sí buuxda oo dhammeystiran;

Markuu Tixgeliyey in -- sida waafaqsan qodobka 143aad Nidaamka Garsoorka oo ilaa iyo hadda dhaqangalka, ee Amar(gooyada) lr. 5, ee 1950 – hawlaha notaayenimada Soomaaliya loo xilsaaray (aaminay) halka notaaye laanta ah;

MARKUU AQOONSADAY dhanka kale baahida degdegga ee loo qabo in noyaaye loo magacaabo Soomaaliya, ayada oo loo marayo tartan caam ah, sida ku cad qodobka 143aad ee la soo xigtay ee Nidaamka Garsoorka;

MARKUU GARWAAQSADAY in – xagga xaaladda sharci ee Dhulka ku sugan yahay Dhulka hadda, loo baahan yahay in wax-ka-beddel lagu sameeyo waxyaabaha uu jideeyey Sharciga 16 Febraayo 1913, ee lr.89, ee ku saabsan Nidaamka Notaayada, xagga qaybta ku saabsan tartanka notaayennimada;

MARKUU DHEGEYSTAY talada Golaha Degaanka;

WUXUU AMRAYAA

Qod. 1

Ayada oo wax laga beddelayo waxyaabaha uu farayo qodobka 5aad ee Sharciga 16 Febraayo 1915, ee lr.89, ee Nidaamka Notaayada iyo keydadka noyaayadeed, si loo helo magacaabidda notaaye ka hawgala Soomaaliya waxaa loo baahan yahay in qofka:

- 1) uu buuxiyey dáda 21 sano;
- 2) yahay mid xagga anshaxa iyo asluubta ceeb-ka-saaliim ah;
- 3) haysto shahaado jaamacadeed oo ay bixisay jaamacad la aqoosan yahay.

Qod. 2

Magacaabista notaayaha Soomaaliya waxaa la sameynayaa ayada oo loo marayo tartan caam ah oo lagu soo bandhigo Xeer, kaasoo lagu dejinayo hababka tartanka u dhacayo, iyo xataa wixii ku saabsan tabarka notaayennimada.

Muqdishu, 31 Maarso 1952.

**MAAMULAHA
Fornari**